




Amarka Sargaalka Caafimaadka Maxaliga ee Deegaanka King

Kulamada ballaaran ee dadweynaha, goobaha ciyaaraha ee gudaha, meelaha jimicsiga, makhaayadaha, iyo baararka waa inay ku waajibiyaan macaamiisha inay tusaan caddeyn tallaal ama baaritaan cudurka laga helin.

Sabteembar 16, 2021



Laga bilaabo 25'ta Oktoobar:

Macaamiisha waxaa lagu waajibin doonaa inay tusaan caddeyn tallaalka COVID-19 ama baaritaan cudurka aan laga helin si ay u galaan:

- **Dhacdooyinka bannaanka (Kulamada)** ee wata 500 oo qof ama ka badan (oo ay ku jiraan dhacdooyinka xirfadleyda, ciyaaraha jaamacadaha iyo madadaalada)
- **Dhacdooyinka (kulamada) ama goobaha ciyaaraha ee gudaha** (oo ay ku jiraan ciyaaraha xirfadleyda, madadaalada, riwaayadaha, shaleemooyinka, miyuusiga tooskaa, meelaha jimicsiga iyo shirarka)
- **Makhaayadaha iyo baararka** (oo ay ku jiraan cunto-cunista gudaha). Tan ma quseyso cunto-cunista bannaanka, macaamiisha cuntada qaata, iyo meelaha inta badan aan loo isticmaalin makhaayad ahaan sida dukaamada cuntada.

Laga bilaabo 6'da Dhiseembar:

Macaamiisha waxaa lagu waajibin doonaa inay tusaan caddeyn tallaalka COVID-19 ama baaritaan cudurka laga helin si ay u galaan:

- Makhaayadaha iyo baararka leh awood 12 kursi ama wax ka yar



Maxaa loo aqoonsadaa caddeyn tallaal?

- Kaadh tallaal ama sawir kaadh tallaal ee CDC (Hey'ada Ka Hortaga Cudurada)
- Cadeyn la diiwangaliyey ee tallaalka oo ka timi diiwaanka caafimaadka ama tallaal-bixiye
- Barnaamijka foonka-gacanta (mobile apps) ee dhaqaatiirta daryeelka caafimaadka (oo ay ansixisay Wasaaradda Caafimaadka ee WA)
- Diiwan dhijitaal ah ama shahaado daabacan ee laga helo MyIRMobile.com ama mareegtooyin kale

Uma baahnid inaad tusto aqoonsi la socda caddeynta tallaalka.

Waa maxay MyIR Mobile?

MyIR Mobile waa bar khadka internetka ku jirta oo dadka siisa marin ay ku helaan diiwaannadooda tallaalka ee gobolka oo rasmi ah. Waxaa kawnto (account) ka furan kartaa

www.MyIRMobile.com

MyIR Mobile wuxuu hadda ku koobanyahay afka Ingiriiska oo keliya. Caawimaad luuqadeed, ama caawin dheeraada ee helidda diiwaannadaada, ka wac Khadka Caawinta Tallaalka Gobolka Washington (833) 829-4357 ama iimeel u dir waiisrecords@doh.wa.gov

Hadii aadan tallaalneyn ama aadan cadeyn karin heerka (xaalada) tallaalkaaga, waa inaad markaas:

- tustaa (muujisaa) cadeynta baadhis
inaadan qabin COVID-19 oo ka timid
sheybaar 72dii saacadood oo ugu
danbeeyey.



Macluumaad dheeraada, booqo
kingcounty.gov/verify

Public Health
Seattle & King County

